



Taariikhda Dhaqangalka: Diseembar 15, 2020

Tilmaamaha Gobolka (Talooyinka) Socdaalka

Maamulka: Lambarka Amarka Fulinta 20-66, ORS 433.441, ORS 433.443

Khusaynta: Dhamaan shaqsiyaadka u safraya ama ku nool Oregon.

Qaabka hagitaanka: Hagahan waxaa ku jira talooyin aan qasab ahayn.

Qeexitaano:

“Safarka muhiimka ah” waxaa ka mid ah shaqada iyo waxbarashada, taageerada kaabayaasha muhiimka ah, adeegyada dhaqaalaha iyo nidaamyada bixinta bedecada iyo adeegyada, caafimaadka, daryeelka caafimaadka ee degdega ah iyo badbaadada iyo amniga.

“Safar aan muhiimka ahayn” waxaa loola jeedaa safar ujeedooyin dalxiis, madadaalo ama ujeedo kale oo aan muhiim ahayn.

Talooyinka Safarka Aan Muhiimka Ahayn

Dhacdooyinka COVID-19 ayaa ku sii kordhaya gobollo iyo dalal badan. Dadka ka yimaada Oregon ee ka imanaya gobollada kale, ama dadka deggan Oregon ee ka soo laabanaya gobollada kale ama waddammada kale, waxay kordhin karaan halista ah inuu ku faafo COVID-19. Intaas waxaa sii dheer, safarka laftiisa wuxuu qatar u noqon karaa soo-gaadhista COVID-19, gaar ahaan ku safridda gaadhsiinta wadaagga sida hawada, baska ama tareenka. Ka fogaanshaha safarka waxay yarayn kartaa halista gudbinta fayraska iyo ku soo celinta fayraska Oregon.

Dadka kaga imanaya Oregon gobolada kale ama dalal kale socdaal aan muhiim ahayn, oo ay ku jiraan soo noqoshada deganayaasha Oregon, waa laakiin looma baahna inay:

- Ku dhaqan [karantiil shakhsi ahaaneed](#) ilaa 14 maalmood ka dib imaanshaha
- Ku xaddid isdhexgalka qoyskooda

In kasta oo karantiil 14-maalmood ah uu yahay midka ugu aaminka badan ee looga hortagi karo faafitaanka COVID-19 ee dadka kale, kuwa u safray Oregon ama dib ugu noqday gurigooda Oregon waxay ka fiirsan karaan inay goor hore soo afjaraan karantiil. ¹ **hadaanay lahayn astaamo [kasta](#):**

- 10 maalmood kadib, iyada oo aan wax baaritaan ah la samayn

AMA

- 7 maalmood kadib, haddii ay ku heleen natiijo taban baaritaanka lid-jidh gale dhaliye ama falgalka silsiladda polymerase (PCR) gudahood 48 saacadood ka hor intaan la soo afjarin karantiilka.

Deganayaasha Oregon waa inay, laakiin aan looga baahnayn:

- Joog gurigaaga ama gobolkooda iskana ilaali safarada aan muhiimka ahayn ee gobollada kale ama waddamada kale.

Talooyinkaani ma khuseeyaan shakhsiyaadka ka gudbaya xuduudaha gobolka ama waddanka safarka lama huraanka ah.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, far waaweyn, ama farta indhooleyaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us

¹ Waxaa jirta fursad yar oo hadii shaqsiyaadka ay doortaan inay yareeyaan mudada karantiilka, ay u gudbin karaan infekshinka dadka kale ka dib karantiil. Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in shakhsiyaadka ay sii wadaan inay iska ilaaliyaan astaamaha maalin kasta. Haddii shakhsiyaadka ay yeeshaan astaamo, waa inay sii wadaan inay ka fogaadaan la xiriirka dadka kale oo ay wacaan daryeel caafimaad bixiyahooda si ay ugala hadlaan baaritaanka.